SOOMAALIYA

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Dhibaatada ugu badan ee colaadda Soomaaliya waxa ay soo gaartay dadka rayidka ah. Dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaaddaas ayaa geystay tacaddiyo waaweyn oo ka dhan ah shuruucda caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo bani'aadannimada. Fatahaado, roob yari, cudurro iyo colaad joogta ah ayaa sababay in dadku ay ku barakacaan gudaha dalka iyo xaalad bani'aadannimo oo adag, gaar ahaan cunno yari. Dadka ku barakacay gudaha dalka ayaa wajahay xadgudubyo xuquuqda aadanaha ah, halka dumarka iyo hablaha ay si gaar ah khatar ugu jiraan tacaddiyada jinsiga iyo kuwa la xiriira colaadaha. Waxaa si weyn loo xakameeyay xoriyadda hadalka, iyada oo la dilay laba weriye. Baarlamaanka ayaa meelmariyay sharci lagu mamnuucayo fuquuqa dadka baahida gaarka ah qaba. Dhinaca Somaliland, dowladda ayaa xadidday xoriyadda hadalka iyo madax bannaanida saxaafadda ka hor doorashadii madaxtinnimada ee aan xilligeeda ku qabsoomin.

XOG GUUD

Khilaaf xooggan ayaa ka dhex billowday Muqdisho iyo Addis Ababa kadib Heshiiskii Isfahanka ahaa ee January ay Itoobiya la gashay Somaliland, kaasoo sida la sheegay Itoobiya looga kireeyay saldhig ciidan oo ay ku yeelanayso xeebaha Somaliland, taa bedalkeedana ay Somaliland u aqoonsan doonto waddan madax bannaan. Soomaaliya oo u aragta Somaliland qeyb kamid ah dalkeeda ayaa Itoobiya ku eedaysay in ay ku xadgudubtay madax bannaanideeda dhuleed.

Bishii March, Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ayaa saxiixay qodobo laga bedalay Dastuurka Kumeelgaarka ah.

Bixitaanka Ciidanka ATMIS ayaa dhaliyay walaac ku aaddan badqabka dadka rayidka ah. 1-dii August, Golaha Amniga iyo Nabadda Midowga Afrika ayaa meelmariyay istaraatijiyad lagu sameynayo Hawlgalka Taageeridda iyo Xasilinta Soomaaliya (AUSSOM), kaasoo bedali doona ATMIS. Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay ayaa 27-kii December ansixiyay hawlgalka cusub.

Bishii June, Soomaaliya ayaa loo doortay in muddo laba sano ah ay xubin aan joogta ahayn ka noqoto Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay, muddo xileedkaas oo ka billaabmaya January 2025.

Kadib doorashooyinkii dhacday November, Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi ayaa madaxtinnimada Somaliland kala wareegay Muuse Biixi Cabdi.

DILALKA IYO WEERARRADA SHARCI DARRADA AH

Dadka rayidka ah ayay dhibaatada ugu badan ka soo gaartay dagaalka u dhexeeya ururka Al-Shabaab iyo dowladda Soomaaliya oo garab ka helaysa xulafadeeda caalamiga ah. Inkastoo la tebiyay khasaaro lixaad leh oo dadka rayidka ah ka soo gaaray dagaallada, haddana ma jirto cid lagula xisaabtamay xadgudubyada ka dhanka ah shuruucda xuquuqda aadanaha iyo bani'aadannimada.

Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) ayaa sheegay in mudadii u dhexaysay January ilaa September uu khasaaraha shacabka ka soo gaaray dagaallada gaaray 854 (295 dhimasho ah iyo 559 dhaawac ah). Al-Shabaab ayaa ka dambeysay 65% oo ah 560 khasaaraha la diiwaangeliyay, halka inta kale ay sababeen laamaha ammaanka, maleeshiyo beeleed, ciidamada dalalka deriska iyo kuwa caalamiga ah.

18-kii March, laba duqeyn oo ay fuliyeen diyaaradaha drones-ka uu Turkiga sameeyay oo taageerayay hawlgal uu milateriga Soomaaliya ka fuliyay beerta Jaffey ee u dhaw tuulada Baqdaad ee gobolka Shabeellada Hoose ayaa waxaa ku dhintay 14 carruur ah, shan dumar ah iyo afar rag ah, kuwaas oo dhammaantood ahaa rayid, waxaana ku dhaawacmay 11 carruur ah, laba dumar ah iyo afar rag ah.

Dhammaantood waxa ay ka tirsanaayeen qabiilka laga tirida badan yahay ee Gorgaarte. Qiimeyn lagu sameeyay sawirrada haraadiga gantaallada goobta ku dhacay ayaa lagu ogaaday in duqeymaha lagu fuliyay bambooyinka MAM-L ee ay ridaan diyaaradaha drone-ka TB-2. Dowladaha Soomaaliya iyo Turkiga ayaan labaduba baarin falkaas, dadka ay dhibaatadu gaartayna ma aysan helin cadaalad ama xaal marin[1].

14-kii March, ururka Al-Shabaab ayaa laba gaari oo laga soo buuxiyay walxaha qarxa ku weeraray huteelka SYL ee Muqdisho. Afar qof ayaa ku dhintay weerarkaas, waxaana ku dhaawacmay 20 kale.

2-dii August, weerar kale oo isugu jiray qof is qarxiyay iyo rag hubaysan oo ay Al-Shabaab ku qaaday xeebta Liido ayaa waxaa ku naf waayay in ka badan 30 qof, halka ku dhawaad 250 qof oo kale ay ku dhaawacmeen, waxaana kamid ahaa laba hawlwadeenno maxalli ah oo ka tirsan Qaramada Midoobay.

XUQUUQDA HELITAANKA CUNNADA

Fatahaado, roob yari, cudurro iyo colaad aan joogsan ayaa sababay xaalad bani'daannimo oo ba'an. Qorshaha Ka Falcelinta Baahiyaha Bani'daannimo ee ay 2024 Qaramada Midoobay u dejisay Soomaaliya ayaa lagu sheegay in 6.9 milyan oo qof ay u baahan yihiin gargaar bani'aadannimo. Cunno yari baahsan ayaa ka jirtay Soomaaliya, waxaana odoros lagu sameeyay habka qiimeynta heerka sugnaanta cunnada ee IPC lagu ogaaday in ugu yaraan 4 milyan oo qof ay wajahayaan cunno yari khatar ah, iyada oo 1.6 milyan oo carruur ah oo da'doodu u dhexayso 6 ilaa 59 bilood ay wajahayeen macluul. Qaramada Midoobay ayaa Soomaaliya ku dartay dalalka ugu saboolsan caalamka. Ururka Al-Shabaab ayaa deegaannada uu maamulo ka mamnuucay in la gaarsiiyo gargaar, taasoo uga sii dartay xaaladda.

XUQUUQDA DADKA KU BARAKACAY GUDAHA DALKA

Dadka ku barakacay gudaha Soomaaliya ayaa wajaha tacaddiyo xuquuqda aadanaha ah iyo xadgudubyo kale. In ka badan 552,000 oo qof ayaa guryahooda uga barakacay fatahaado, abaaro, colaad iyo cunno yari. Sida ay sheegtay Qaramada Midoobay, mudadii u dhexaysay January ilaa August, ku dhawaad 200,000 oo qof, oo intooda badan horay ugu barakacay gudaha dalka, ayaa si qasab ah looga raray goobihii ay daganayeen guud ahaan Soomaaliya. Dumarka iyo carruurta oo wajaha xadgudubyo jinsiga la xiriira, kufsi iyo rarid qasab ah, ayaa 80% ah dadka ku barakacay gudaha dalka.

XORIYADDA HADALKA

Xoriyadda hadalka, gaar ahaan madax bannaanida warbaahinta ayaa la xaddiday. Laba weriye ayaa la dilay, oo midkood ay ahayd Amuun Cabdullaahi Maxamed oo ay toogteen dabley la rumaysan yahay in ay xiriir la leeyihiin Al-Shabaab. Laamaha amniga ayaa weerar, cago-jugleyn, cabsi gelin, garaac, xarig iyo maxkamadeyn kula kacay weriyayaal.

Ururrada u dooda xorriyada saxaafadda ayaa ka horyimid magacaabidda sagaal xubnood oo loo xulay Golaha Warbaahinta Qaranka, iyaga oo ku dooday in hannaanka lagu soo xulay iyo qaab dhismeedka golaha uu hareermarsan yahay Sharciga Warbaahinta 2020, isla markaana uusan golaha ka madax bannaaneyn dowladda. Magacaabista xubnaha oo ay soo jeedisay wasaaradda warfaafinta ayaa waxaa 14-kii March ansixiyay golaha wasiiradda xukuumadda federaalka. Dhisidda golaha oo shaqooyinkiisa ay kamid tahay ilaalinta shuruucda ayaa soo jiitameysay tan iyo 2016.

22-kii July, booliska Soomaaliya ayaa xiray CaliNuur Salaad oo ah asaasaha iyo madaxa warbaahinta gaarka loo leeyahay ee Dawan. Waxa uu habeen ku baryay saldhigga degmada Waaberi, ka hor inta aan loo dhaadhicin xabsiga dhexe ee Muqdisho. Xarigiisa ayaa lala xiriiriyay qoraallo uu ku faafiyay baraha bulshada oo uu ku tilmaamay in laamaha amniga ay u nugul yihiin weerarrada Al-Shabaab, khaadka ay cunaan awgii. 23-kii July, CaliNuur Salaad ayaa la horgeeyay maxkamadda gobolka Banaadir iyada oo aanu la socon qareen. Waxaa damiin lagu sii daayay 27-kii July, balse waxa uu ku eedeysnaa qodobo kamid ah xeerka ciqaabta, sida "Ceebaynta sharafta iyo sumcada Madaxa Qaranka, falal anshax xumo, faafinta iyo daabacaada anshax xumo, af-lagaado iyo ceebayn," waxaana sidoo kale laga mamnuucay in uu safro ama uu la hadlo warbaahinta.

TACADDIYADA LA XIRIIRA GALMADA AMA JINSIGA

Waxaa sii socday tacaddiyada jinsiga ku salaysan, gaar ahaan kuwa kufsiga ee ka dhasha colaadaha ee loo geysto dumarka iyo gabdhaha. Qaramada Midoobay ayaa sheegtay in mudadii u dhexaysay January ilaa September ay dhaceen 13 fal oo ah tacaddiyo jinsi la xiriira colaadaha oo loo geystay 32 dumar iyo gabdho isugu jira. Mid kamid ah dhacdooyinkaas ayaa lagu sheegay in 26-kii February ay laba askari oo ka tirsan guutada booliska milateriga ee Ciidanka Xoogga Qaranka ay sida lagu eedeeyay kufsadeen laba gabdhood oo walaalo ah, da'dooduna ahayd 15 iyo 16 jir. Laba dhacdo ee kale ayaa lagu sheegay in ay ahaayeen gabdho qasab lagu guursaday, mid lagu qasbay xubin Al-Shabaab ah, halka gabadha kalena lagu qasbay askari dowladda ka tirsan, dhacdooyinkaas oo laga diiwaangeliyay maamulka Jubbaland. 16 kamid ah 32 dumarka ah ee dhibaatooyinka loo geystay ayaa ahaa dadka ku barakacay gudaha dalka. Baarlamaanka federaalka ayaa ku guuldaraystay inuu meelmariyo shuruuc looga hortagayo tacaddiyada jinsiga iyo gudniinka gabdhaha.

XUQUUQDA DADKA BAAHIDA GAARKA AH QABA

Baarlamaanka federaalka ayaa 31-kii July ansixiyay sharci mamnuucaya fuquuq kasta oo loo geysto dadka baahida gaarka ah qaba, waxaana uu sharciga meesha ka saaray arrimaha dadkaas ka hor istaagi kara shaqaaleysiinta iyo in ay si buuxda uga mid noqdaan bulshada.

SOMALILAND

XORIYADDA HADALKA

Waxaa Somaliland ka dhacay xadgudubyo dhanka xoriyadda hadalka ah, gaar ahaan xilliyadii ay soo dhawaatay doorashadii madaxtinnimada ee aan waqtigeeda ku qabsoomin. Waxaa la xiray oo la maxkamadeeyay weriyayaal, siyaasiyiin iyo dad kale oo dhaliilay dowladda.

Xubno ka tirsan sirdoonka Somaliland ayaa 6-dii January xoog ku galay xafiisyada uu telefishinka MM Somali ku leeyahay Hargeysa, waxaana ay joojiyeen dood si toos ah u socotay oo looga hadlayay Heshiiska Isfahanka ay gaareen Itoobiya iyo Somaliland ee khilaafka dhaliyay (eeg qeybta sare ee xog guud). Askartaas ayaa xirtay gudoomiyaha MM Somali TV, Maxamed Cabdi Sheekh (Ilig), farsamo-yaqaan Ilyaas Cabdinaasir iyo weriye Maxamed Cabdi Cabdillaahi. Waxa ay goobta ka qaateen qalab ay kamid yihiin kombiyuutarro, kaamerooyin iyo aaladaha tebinta tooska ah. Maxamed Cabdi Cabdillaahi iyo Ilyaas Cabdinaasir ayaa la sii daayay 9-kii January iyaga oo aan wax dacwad ah lagu soo oogin, hayeeshee Maxamed Cabdi Sheekh ayaa xirnaa ilaa 20-kii February markaas oo ay sii deysay Maxkamadda Gobolka Maroodi-Jeex ee ku taalla Hargeysa.

Booliska Somaliland ayaa 2-dii September xiray xildhibaan Maxamed Abiib oo ka tirsanaa xubnaha ugu caansan mucaaradka, waxaana loo dhaadhiciyay xabsiga Mandheera. Ka hor xarigiisa, xeer ilaaliyaha guud ee Somaliland ayaa ka codsaday Golaha Wakiilada in ay xasaanadda ka qaadaan Maxamed Abiib, codsigaas oo uu diiday baarlamaanka. Xeer ilaaliyaha guud ayaa ku eedeeyay xildhibaanka inuu la kulmay mas'uuliyiin ka tirsan dowladaha Soomaaliya iyo Jabuuti iyo in uu dhaliilay dagaalkii Somaliland ay 2023 ka waday magaalada Laasacaanood ee gobolka Sool. Waxaa la sii daayay 29-kii September kadib amar ka soo baxay Maxkamadda Sare ee Somaliland oo xarigiisa ku tilmaantay mid sharci darro ah.

[1] Somalia: Death of 23 civilians in military strikes with Turkish drones may amount to war crimes – new investigation, 7 May